# Darawaliinta Tagaasida iyo Xaqiiqooyin degdeg ah

**<u>Sida looga hortagi karo Dhaca iyo Rabshadaha</u>**

Ahaansha dareewal tagsi waxay noqon kartaa shaqo khadar badan. Goobta shaqada dhibta ka dhacdaa waxay sababi kartaa dhaawacyo iyo dhimasho labadaba.

Dhibaatooyinka dhici kara waxaa ka mid noqon kara dhibaato muuqata iyo, xadgudub afeed oo ay ka mid noqon karaan dareewalka oo lagu qaayliyo iyo magic xun ugu yeedhid.

Warqadan xaqiiqoyinka dhaca ka hadlaysaa waxay baraysaa dareewalka xirfadaha uu kaga hortegi karo ama ku yarayn karo dhibaatoyinkan dhici kara xiliga uu shaqada ku jiro.

**MUUQASHADA**

Aragti balaadhan oo aad tagsigaaga u leedahay waxay kaa caawin kartaa yaraynta xadgudubyada.

- Gadhigaaga dhig meelaha aadka u iftiinka u ah, meelaha aadka u muuqata haddii aadan marka aanad rakaabka qaadayn
- Si aanay dadku u arki waayin gudaha gaadhiga ha qarin daaqadaha gaadhiga, si waafaqsan Sharciga gaadiidka waddooyinka.
- Daaqadaha gaadhigu waa in ay nadiif yihiin, isla markaana anay ku dhegsanayn wax qarin kara gaadhiga gudihiisa.

**LA TACAALIDA LACAGTA CADAANKA AH**

**Yaraynta qaadashada lacag cadaan ah markad tagsiga ku shaqaynayso waxay yarayn kartaa in aad bar tilmaameed u noqoto budhcada wax dhacada**

- Yaree lacagta cadaanka ah ee aad gacanta ku hayn kartit adiga oo xooga saaraya in aad meel dhigtit.
- Meesha ay suurogal tahay, waxad isticmaashaa hab aad lacagta cadaanka ah ku yarayn karto.
- Ku dheji albaabka rakaabka iyo daaqadaha odhaah sheegaysa in aad dareewalku hayn lacag kaasha ah oo badan.

**KA SHAQAYNTA TAGSIGA**

**Hubi in tallaabooyinka badbaadada tagsigaagu sax yihiin oo ay shaqaynayaan.**

- Ilaali oo tijaabi in ay shaqaynayso kamarada ilaalada ee tagsigaaga. Calaamad tusaysa in uu tagsigu leeyahay kamarada ilaalada ku dheji tagsiga si dadku u arakaan.
- Hubi in ay shaqaynayaan laydha gaadhiga ee lashidho markad xaalad degdeg ah la kulantid. Iyo in aad isticmaali kartid hadii aad u baahato.
- Ka warhay aamusiinta alaamka.
- Isticmaal aladaada caawinta iyo ta gaadhigaba sida GPS-ka hadii aad caawimaad u baahado.

- Daar laydhka gudaha tagsiga marka aad rakaabka qaadayso iyo marka aad dejinaysoba.
- Si joogto ah ula hubi direhaaga ama dareewal kale.
- Isticmaal, oo kuna ceceli habka isgaadhsiinta degdega ah adiga oo la wadagaya diraha ama dareewal kale.

**LATACAALIDA MACAAMISHA**

**U diyaar garaw xaaladu nabadgelyo daro oo rakaabka ka dhici kara**

- Ha ka daba tegin dadka rakaabka ha.
- Waydiiso gambaniga shaqada tababaro la xidhiidha badbaado qabka iyo sida loo aqoonsado xaalada aan deganayn
- Ha lamurmin tuugta. Haqataan waxay qaadanayaan ee police- ka u ribood garee iyo ciddii shaqada kuu dirtay.
- Markiiba u sheeg qofkii shaqada kuu diray hadii aad qof dariiqa ka qaadayso.
- Markiiba u sheeg qofkii shaqada kuu diray ama dareewal kale hadii oo qofkii aad soo qaatay bedelay meeshii uu tegayay.
- Markiiba u sheeg qofkii  shaqada kuu diray ama dareewal kale hadii meesha aad maraysaa ay u eegtahay meel cabsi-cabsi ah.

**Hadii aad Xaalad khadar ah dareento waxad wici kartaa 911**